

## SHAQADA QOYNSKA IYO DARYEELAHA:

Sibteembar 2020

Taageerida Da'yarta Ingiriiska Baranaysa ayadoo la adeegsanaayo Waydiimo iyo Jawaabo ku saabsan Qoraal Xog bixinaaya

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

*Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES*

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurutu waxay xoojin karaan luuqadooda maalin kasta ayagoo waydiinaaya kana jawaabaaya su'aalo ku saabsan mawduuc ama qoraal xog bixinaaya. Inta lagu jiro shaqadaan, waxaad waydiin doontaa cunugaaga inuu ka hadlo wixa uu akhriyo, maqlo, ama ka ogaado mawduuc ama qoraal xog bixinaaya.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku waydiinta iyo uga jawaabida su'aalaha luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

## Maxaad u waydiinaysaa ugana jawaabaysaa su'aalo ku saabsan mawduuc ama qoraal xog ah?

Waydiin iyo ka jawaabida su'aalo ku saabsan mawduuc ama qoraal xog ah waxay u sahlaysaa carruurta inay adkeeyaan luuqadooda.

### Aan biloowno!

Raac tallaabooyinka soo socda. **Gadaal ka firi fikradaha qoraalka xogta bixinaaya iyo firadaha taageerooyinka dheeraadka ah ee luuqada.**



► **Talaabada 1 aad: La wadaag** ama **la akhri** qoraal xog bixinaaya cunugaaga, sida xayawaanada, cunto, ama wax uu wax ka baranaayo ama xiisynaayo.



► **Talaabada 2 aad: Waydii su'aalo** kahor, inta lagu jiro, iyo kadib akhrinta qoraal xog ah.

- Ka caawi cunugaaga “balaarinta luuqadiisa.” Haddii cunugaagu uga jawaabo su'aalahaaga hal eray, waydii inuu erayo kale ku daro jawaabiisa. Tusaale ayaad ka siin kartaa arrintaan.
- **Waydii su'aalaha dulmarka ah iyo kuwa macnaha hoose.** Su'aalaha dulmarka ah ayaa ka caawinaaya cunugaaga inuu xsususto waxa uu ka akhriyo qoraalka. Tusaale: *Muxuu qoraalku ka hadlaayay?* Su'aalaha qotoda dheer waxay ka caawinayaan cunugaaga inuu ka fakaro qoraal uuna aruursho fikrado. Tusaale: *Maxaa ugu xiiso badnaa qoraalkaan? Sababta?*



► **Talaabada 3 aad: Ku dhiiri geli** cunugaaga inuu **sawiro ama qoraal la sameeyo** xogta mawduucaan.

**Yoolka Waxbarashada:** Carruurutu waxay xoojin doonaan xirfadahooda luuqada hadalka.

**Buundooyinka:** Fasalka birimada-3aad

**Agabka:** Mawduuc ama xog qoraal ah oo aad doonayso inaad la wadaagto cunugaaga: waraaq iyo qalimaanta midabka, qalin qori, ama qalin koobi

Shaqada Qoyska iyo Daryeelaha: Taageerida Da'yarta Ingiriiska Baranaysa ayadoo la adeegsanaayo Waydiimo iyo Jawaabo ku saabsan Qoraal Xog bixinaaya

## Noocyada Qoraalka Xogta ee aad U akhrin karto Kalana Sheekaysan karto Cunugaaga

- Buugaagta, muuqaallada, ama webseedyada wadaaga xaqiqooyinka ku saabsan wax (xayawaannada, miraha, cimilada, ciyaaraha, iwm.)
- Shaqada dugsiga
- Bokisyada seeriyaalka
- Maqaallada wargayska
- Qoraalka lagasoo qaado wargayska
- TilmaamahaTilmaamaha (sida loo ciyaaro ciyaar, loogu shaqeeyo boonbile cusub, iwm.)

## Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Cunugaaga ayaa balaarin kara ama kobcin kara luuqadiisa marka uu ku waydiinaayo kana jawaabaayo su'aalo ku saabsan mawduuc ama qoraal xog ah. Iskuday inaad adeegsato su'alaha iyo jawaabaha hoose intaad kala hadlayso qoraalka xogta ah cunugaaga.

Su'alaha Dulmarka ah oo aad ka waydiinayso Mawduuc ama Qorala Xog ah	Jawaabaha Laga Bixin karo
Muxuu qoraalku nooga sheegayaa ____?	Qoraalkaan wuxuu ku saabsanaa ____.
Maxaad marhoraba ka ogayd ____?	Horay ayaan u ogaa ____ xogta ____.
Maxaad la yaaban tahay ____?	Waxaan la yaabaa ____ iyo ____.
Maxay ____ u dhacday? Sidee ayaan ku ogaanaynaa?"	Waxaan u malaynayaa in arintaani u dhacday sabab la xariirta ____.

Su'alaha qotoda dheer ood Ka waydiinayso Mawduuc ama Qorala Xog ah	Jawaabaha Laga Bixin karo
Ka waran haddii ____?	Waxay ila tahay ____ waayo ____.
Maxaa ugu xiiso badnaa qoraalkaan? Sababta?	____ ayaa ugu xiiso badan waayo ____.
Maxaad ka baratay qoraalka?	Laga bilaabo qaybtaan qoraalka, “____,” Waxaan bartay ____.

### Xujada Luuqada:

Carruurtu waxay xoojin karaan luuqadooda maalin kasta ayagoo waydiinaaya kana jawaabaaya su'aalo ku saabsan mawduuc ama qoraal xog bixinaaya. Hadda oo cunugaagu ka jawaabay **su'alaha**, ku boori inuu **ku waydiyo su'aalo** aad adigu ka jawaabayso oo ku saabsan mawduuc ama qoraal xog ah. Carruurtu way abuuri karaan su'aalo iskood ah si ay kuu waydiyaan ama waxay adeegsan karaan qaar kamid ah su'alaha ku jira shaxda kore. Waydiinta su'aalo waxay u sahlaysaa carruurtu inay balaarshaan luuqadooda isticmaalkooda maalin laha ah.

